WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TACLIINTA SARE

IMTIXAANKA FASALKA 4AAD, 2019

# AF-SOOMAALI

20
19

XAFIISKA IMTIXAANAADKA PUNTLAND

# WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TACLIINTA SARE
# XAFIISKA IMTIXAANAADKA PUNTLAND

Code Number

IMTIXAANKA FASALKA 4AAD, 2019
AMIN 2 SAAC IYO 10 DAQIIQO AKHRIS AH

# AF-SOOMAALI

**TILMAAMAHA IMTIXAANKA**

- Waxaa imtixaanku ka kooban yahay 11 bog
- Tiri bogagga, hadday wax ka maqan yihiin u sheeg ilaaliyaha imtixaanka
- Haku qorin magacaaga iyo Roll lambarkaaga toona warqadda imtixaanka
- Hubi in waraaqda lifaaqu ku dhegen tahay imtixaanka, hadday kaa maqan tahay u sheeg ilaaliyaha imtixaanka.
- Lama ogola waraaqo dheeraad ah
- Jawaabtu hadday kaa qaldanto isku tallaab saar, kadibna qor tan saxda ah.

**Imtixaanku wuxuu ka kooban yahay:**

| QAYBTA | DHIBCAHA |
|---|---|
| Qaybta 1aad: Sheeko | 17 dhibcood |
| Qaybta 2aad: Suugaan | 23 dhibcood |
| Qaybta 3aad: Naxwe | 18 dhibcood |
| Qaybta 4aad: Hiddaha iyo dhaqanka | 24 dhibcood |
| Qaybta 5aad: Curis | 18 dhibcood |
| | **Wadarta: 100 Dhibcood** |

**Waxaa iska leh saxaha**

| QAYBAHA | DHIBCO |
|---|---|
| QAYBTA 1AAD | |
| QAYBTA 2AAD | |
| QAYBTA 3AAD | |
| QAYBTA 4AAD | |
| QAYBTA 5AAD | |
| WADAR | % |

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com
SOM EXAMS

Boggan lama saxayo. Waxaa loo baneeyey feegaarka.


©PNEB 2019
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com
SOM EXAMS

## QAYBTA 1AAD: SHEEKO -----------------------------------------------------17 DHIBCOOD

**Akhri sheekadan, dabadeedna ka warceli weydiimaha kaaga imandoona**

Nin ayaa beri niyadda geliyey in uu doono gabar meel ka fog joogta, waxa uuna kaxaystay biddihiisii (addoonkiisii) si uu ugu wehelyeelo, degsiimadu geyiga kuma badna, marka ay gelin wax ku dhow socdaanba, waxaa laga yaabaa inay jees meel deggan arkaan, wax dudo ahna aanay isha ku dhufan. Cid kasta oo meeshaas socdaal ku martaana haddii aaney sahay iyo biyo qaadan khatarta u galaan dhimasho, subaacuna waa u dheer yahay.

Safar ayey isu qalqaaliyeen, waana jarmaadeen, si ay qaboonada dhulka intiisa badan u dhaafaan. Waxay socdaanba, harka galay ayey geed hooskiisa xoogaa isku tuureen, wax qumman intaanay jiifin ayey ka tooseen. Inta ay bisinka qabsadeen ayey jidka laba ka dhigeen. Galabtii iyo ilaa caweysinkii cag ma dhigin mar ay kortag u hakadeen mooyee.Habeenkii waxa ay u hoyden jabad laga guurey, sahaydii ay siteenna mar bay u fadhiisteen.

Aroortii hore ayey ka tooseen, ka dibna socodkoodii ayey sii wateen, waxa ay socdaanba, goor aasku sii madoobaanayo ayey ishoodu qabatay ceel shubaal ah, oo xarig dheeri dul yaallo, way fiicnaan lahayd in wax la daro ay ka heli lahaayeen ceelka, mase dhicin.

Waxaa talo ku soo ururtay in marba nin ceelka loo rido, si uu uga soo cabbo ceelka, waxaana ku horreeyey biddihii, markii uu biyihii si fiican usoo cabbey ayaa seyidkii xarigii soo guray si uu bidduhu u soo boxo. Ka dibna isagii ayaa ceelkii loo ridey, si uu isna uga soo cabbo, seyidkii markii uu bihii ka dhergey ayuu saaxiibkii ka codsaday in uu ceelka ka soo saaro, hase yeeshee dheg uma jalaqsiin, baryootan, beerlaxawsi iyo wada hadal dheer ka dib, waxa uu soo saaritiisa ku xiray saddex shardi oo adag, sayidkii oo ballan oofin lagu yiqiin ayaa aqbalay shuruudihii bidduhu ku xiray, kol haddii naftiisa uu ku furanayo. Saddexda shardi waxa ay ahaayeen sidan;

a. In bidduhu uu noqdo nin xor ah.
b. In Sayidku noqdo bidde uu isagu leeyahay.
c. In uu gabadha guurdo biddihii xoroobey.

Ceelkii ayaa laga soo saaray, alaabtiina isaga ayaa lagu wareejiyey in uu qaado,waayo waxa uu noqda bidde. waxaa hore laga sii bilaabay socodkii, nasiib wanaag fiid horaadkiiba waxaa laga cid galay reerkii gabadha laga doonay. Maadaama oo ay ahayd xilli habeenimo ah waxaa ninkii ardaa dhiga ahaa loo gogley aqal laba daryaale ah, oo gabadha walaalkeed deganaa.

Waxaa markiiba la la gaarey caano, waxaana la loogey wan subag madoobe ah, waxaana dabka loo tuuray kirli shaah ah, waxaana lagu boobay soo dhoweyn uu kalgacal ku dheehan yahay. Gabadhii la soo doonay oo si fiican u lebisani ay cashadii loogu sii dhiibey. Ninkii biddaha ahaa waxa uu halabsaday xeeradii oo aan weli gabadha faraheeda ka soo wada bixiin, taas oo dareen gelisey inanta la saanyadey ee il dheerida iyo deganaanta Eebbe ku manaystay, intii uu cashaynayey iyada oo kaftan ku tuurtuuraysa ayaa ay isha ku dhufatay,


©PNEB,2019
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com
SOM EXAMS

sida hamuun gorayada leh ee uu wax u cunayo. Dabadeedna waxa ay weydiisey saddex weydiimood oo ah:

**(1)** Cunto aad cunto tee baa kuula macaanayd?
**(2)** Gogol aad jiifsato tee kuula fiicnayd?
**(3)** Wax aad qaadose maxaa kuugu cuslaa?

**Si ka fiirsi la'aan ah ayuu uga jawaabey su'aalihii ay gabadhu weydiisey**

**(1)** Cunto aan cuno waxaa iila macaanayd tan caawa aan cunay.
**(2)** Gogol aan ku jiifsado waxa iila fiicnayd tan aan hadda joogo.
**(3)** Wax aan qaadona waxaa iila cuslaa calool maran.

Markaas ayaa inantii intay weelkii qaaday aabbeheed u warantay una sheegtay in wax si yihiin, ninkuna aanu ahayn nin gobanimo meel u soo marto. Odaygii waxa uu talo weydiiyey odayaashii deriska ahaayeen, waxana ayna talo ku gobo' tiri in ninka la socda wax la weydiiyo.

Saddexdii weydiimood ayaa sidoodii loo weydiiyey. Waxaana uu ku jawaabey:

**(1)** Cunto aan cuno waxaa iila macaaanaa candhuuftayda oo aan caafimaad ku laqey.
**(2)** Gogol aan ku seexdo waxa iila fiicnayd tan aan seexdo aniga oo aan godob ah qabin.
**(3)** Wax aan qaadona waxaa iila cuslaa ballan aan galay.

Halkaas ayaa lagu ogaadey in ay wax is dhaafeen, markii hoos la isu waraystay ayaa gabadhii loo meheriyeyninkii markii horeba soo hayb doonay.

**a. Sheeg macnaha erayadan sheekada laga soo xulay....................05 dhibcood**

1. Labo-daryaale ______________________
2. Qaboono ______________________
3. Duddo ______________________
4. Bidde ______________________
5. Il-dheeri ______________________
6. Dawlis ______________________


©PNEB,2019
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com
SOM EXAMS

**b. Ka jawaab su'aalahan soo socda........................................... 12 dhibcood**

1. Maxaa uu seyidku caan ku ahaa?______________________________

2. Muxuu seyidku alaabta qaadisteeda u la wareegey?

______________________________

3. Maxay labada nin hal mar ceelka uga wada-cabbi waayeen?

______________________________

4. Maxay ahaayeen shuuridihii seyidka lagu xiray, si ceelka looga soo saaro?

______________________________

5. Maxay gabadhu biddaha ku garatay?

______________________________

6. Waa maxay sababta ay Soomaalidii hore isu hal-xiraalayn jireen marka ay is guursanayaan?

______________________________

**QAYBTA 2AAD: SUUGAAN.................................................... 23 dhibcood**

**A. Gabay:** Gabaygan waxaa tiriyey Cismaan Yuusuf Keenadiid waxa uuna gabayga ku hoga tusaalaynayaa wiil uu dhalay, oo uu aad u jeclaa uuna la doonayo in uu dabeecadihiisa oo kale yeesho, wuxuuna uga waramayaa dhaqankiisa, wuxuuna yiri:

1. Baalada ma fiirsado intaan baar Jaraaf tago'e
2. Bushimahayga uma quuri karo buuri iyo jaade
3. Waa iga bakhtoo kale anfaco beriga Soonqaade
4. Bidcana ma ictiqaadiyo sharciga waxan bannaanayne
5. Ba'naan uuumiyaha kuma galiyo baadil iyo ceebe
6. Bahdaa xaasid ma iraahdo iyo bi'i xigaalkaaye
7. Ballankii aan qaadiyo axdiga baaji ma aqaane
8. Runtana niman ka bayraa jiree ma ihi beenlowe'
9. Baxaalkaygu waa kaas haddaad baran Siciidowe


©PNEB,2019
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com
SOM EXAMS

**Ka warceli weydiimaha kaaga iman doona gabayga ah....................... 08dhibcood**

1. Waa maxay sababta uu abwaanku gabaygan u tiriyey?

___________________________________________

2. Tuducee ayuu abwaanku ku tilmaamayaa in uu ka fog yahay mukhaadaraadka ?

___________________________________________

3. Muxuu uga jeeddaa erayga "Ba'naan"

___________________________________________

4. Sheeg laba sifo oo ka mid ah dhaqanka abwaanka adigoo ka soo saaraya gabayga?

___________________________________________

___________________________________________

**B. Hees hawleedyo ...............................................10 dhibcood**

Isku aaddi hees hawleedda iyo waxa loogu heeso, adiga oo adeegsanaya erayada shaxda ku dhex jira.

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| Kebedda | Geela | Lo'da | Fardaha | Haanta |
| Maqasha | Xijiga | Kalluunka | Riyaha | Idaha |

1. ________ Careef camal xume, wuxuu xalay ciyey, oo cargaagtamey, cirki ma intaa.
2. ________ Galaalo ilmaha, geed caleenliyo, galool u hargeey, oo ha garab marin.
3. ________ Baroor food dheer, oo fanku cad yahay, waaya laga fuul, waana laga fili.
4. ________ Meel xabbado badan, oo rag ku xarbiyey, oo xinjiritaal, xayaad ololaay
5. ________ Geedba geedka u dheer laga garaacyeey, galool mudhay mayraxdiisaay.
6. ________ Ma fiyoobidoo ku arkay, xarigiina lama furine, ma furtaa lagaa dhuugey.
7. ________ Mar haddaan migaaf kiyo malawida u qaato, maydi waa magool weyne.
8. ________ Nin Summaan badsaday, oo seebka ruxay, baddu u sahlanaa .
9. ________ Garooy qalabooy, wax ma qaadida, qawlka hoosiyo qaloonbiga daa.
10. ________ Cawl cawlaneey cawskii gu'gii ka laguu ceshee ma u ciil qabtaa.



©PNEB 2019

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

SOM EXAMS

**C. Min hal maahmaah ka qor kuwan soo socda...................... 05 dhibcood**

1. Nabadda ______________________________
2. Dabka ______________________________
3. Caanaha ______________________________
4. Biyaha ______________________________
5. Geela ______________________________

## QAYBTA 3AAD: NAXWE .......................................................... 18 dhibcood

**a. Ka soo saar midka saxda ah, kuna qor meesha loo banneeyey....... 05 dhibcood**

1. Ballan aan galay ayaa igala culus wax kasta. ***Ka soo saar Falka*** __________
2. Taliyihii waxa uu is casiley shalay ***Ka soo saar magac u yaalka*** __________
3. Qalinka abxadda agteeda ka raadi. ***falkaab meeleedka*** __________
4. Hoosgunti ayuu nasiiyey odayga. ***Ka soo saar magaca lammaan*** __________
5. Ceelasha ayaa biyo badan leh. ***Ka soo saar qodobka ku jira*** __________

**b. Goobo geli jawaabta saxda ah.......................................... 05 dhibcood**

1. Marka erayga **Janjal** wadar laga dhigo, qodobka raaci doonaa waa:
   - a. da
   - b. Ka
   - c. sha
   - d. ga
2. Magaca gaarka ah ee ku jiraa magacyadan waa kuma?
   - a. Dad
   - b. Libaax
   - c. Aqal
   - d. Canjeel
3. Hawraarta sii soco falkaabka ku jiraa waa "sii" waana falkaab:
   - a. Jiho
   - b. Waqti
   - c. Meeleed
   - d. Masaafo
4. Waxa luuqadda khaladka ka ilaaliya waxa la yiraahdaa:
   - a. Maldah
   - b. Naxwe
   - c. Sifeeye
   - d. Tifaftire


www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com ©PNEB 2019
SOM EXAMS

**c. Sheeg kuwan soo socda shaqooyinka ay qabtaan………………… 08 dhibcood**

1. Falkaab jiho

_______________________________________________

2. Magac guud

_______________________________________________

3. Astaan Joogsi " ."

_______________________________________________

4. Astaan yaabeed "!"

_______________________________________________

**QAYBTA 4AAD: HIDDAHA IYO DHAQANKA……………..........24 DHIBCOOD**

**A. Goobo geli jawaabta saxda ah……………………………. 10 dhibcood**

1. Xabku waa harag biyaha lagu dhaansado, lagana isticmaalo dhulka Soomaalidu degto qaarkiis; marka uu cusub yahayna waxaa loo yaqaan:
   a. Xarke
   b. Xurke
   c. Xarfe
   d. Xorre

2. Naysha yar ee ay hooyadeed dhimato, caanaha la dhaqsiiyo, waxaa loo yaqaan:
   a. Heebo
   b. Heello
   c. Heeco
   d. Heemo

3. Noocyada cuntooyinka ah ee la beero sida: harruurka, galleyda iyo bariiska iyo wixii la mid ah waxaa loo yaqaan:
   a. Damag
   b. Dalag
   c. Dalaf
   d. Dalab


©PNEB,2019
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com
SOM EXAMS

4. Sheyga qofka loo ekaysiiyo, si aanay bahaluhu ugu soo dhicin xerada xoolaha waxaa loo yaqaan:
   a. Maganlooti
   b. Magarlooti
   c. Mahalooti
   d. Madarlooti

5. Saliidda doonyaha la mariyo, si aaney biyaha baddu wax u yeelin, lagana sameeyo beerka libaax badeedka; waxaa loo yaqaan:
   a. Siibad
   b. Siilad
   c. Siirad
   d. Siifad

6. Miraha dhirtu marka ay u dhexeeyaan bisayl iyo ceeriin, waxaa loo yaqaan:
   a. Qarbe
   b. Qardhe
   c. Qardab
   d. Qarfad

7. Haanta laga tolo Qabada, Argeegta iyo Cawda ee aan weli la xoolayn, waxaa loo yaqaan:
   a. Golayo
   b. Gosobyo
   c. Gocayo
   d. Golayo

8. Jeermis dilaha ay reer miyigu u adeegsadaan weelkooda, waxaa la yiraahdaa:
   a. Asal
   b. Alas
   c. Asay
   d. Askax

9. Geela qaybtiisa guran ee meel gaar ah u daaq-tagta, waxaa loo yaqaan:
   a. Gaale
   b. Gaawe
   c. Gaade
   d. Gaane

10. Caanaha reer miyigu shirka keenaan si ay ugu Alle baryaan waxaa loo yaqaan:
   a. Dhito
   b. Dhifo
   c. Dhawrto
   d. Dhito


©PNEB 2019
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

**B. Isku beeg meesiga iyo ilmihiisa caanadeyska ah……. 04 dhibcood**

| Biraar | Aalo | Ugeyb | Qaan |
|---|---|---|---|

1. Geela ____________
2. Riyaha ____________
3. Idaha ____________
4. Lo'da ____________

**C. Erayadan ku dar erayga la macnaha ah oo shaxda ku jira. 05 dhibcood**

| Oodkac | Arad | Badho | Saalo | Abooto |
|---|---|---|---|---|

1. Oori, Afo ____________
2. Baaqimo, Gabno ____________
3. Digo, Hiil ____________
4. Muqmad, Collob ____________
5. Ayeeyo, Macooyo ____________

**D. Ka warceli dhammaan weydiimahan soo socda……………… 05dhibcood**

1. Sheeg magaca loo yaqaan neefka lo'da ah ee uu midabkiisu casaan yahay?

   ________________________________________

2. Waa kuma xayawaanka la dhaqdo ee uu codkiisu yahay dananka?

   ________________________________________

3. Maxaa la isku yiraahdaa lo'da iyo geela?

   ________________________________________

4. Maxaa loo yaqaan hadalka daboolan oo ay ujeeddo kale ku qarsoon tahay?

   ________________________________________

5. Maxaa la yiraahdaa biyaha ugu dameeya oo ay xooluhu cabbaan marka ay ceelka ka fulayaan?

   ________________________________________


©PNEB,2019
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com
SOM EXAMS

## QAYBTA 5AAD: CURIS........................................ 18 DHIBCOOD

Ciwaanadan midkood dooro, dabadeedna ka qor qoraal aan ka badnayn meesha bannaan.

1. Waxtarka ay biyuhu uu leeihiin Aadanaha.
2. Waajibaadka waddankaagu kugu leeyahay.

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com



©PNEB, 2019

Dhammaad.


©PMEB 2019
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com -